HADAF
Xarunta HADAF ee Cilmi-baadhista iyo Horumarinta
HADAF Research & Development Center

## Faallo, (010)

# Biyo yarida Magaalada Badhan (Wadada xalka).

**Hordhac:**

Biyuhu waa mid ka mid ah waxyaalaha asaaska u ah nolosha aadanaha, la'aantoodna halis geleyso jirintaankoodu, isla markaasna aan horumar kale lagu talaabsan karin.

Waxa aynu la soconaa in magaalada **Badhan** ee gobolka Sanaag oo caan ku ahayd hal-ku-dhegga ah **"Biyo la hubaa waa Badhan"** ay waqtiyadan danbe la kulantay Biyo yari baahsan taas oo ay keentay:

1. Ilaha biyaha oo aad u yar.
2. Korodhka Bulshad iyo mashaariicda horumarineed ee ka socda magaalada.
3. Saameynta Isbedelka cimilada iyo abaarta soo noqnoqoday oo raad ku leh inay yaraadaan biyaha hoose.

Waxa intaas u sii dheer in ilaha biyaha ee yar ee jiraana aanay ku habooneyn isticmaalka nolosha sida; cabitaanka, cunta karinta, … IWM.

Waxa la sameeyey isku dayo badan si ceelal riggag ah (ugu yaraan 13 ceel) loogu qodo magaalada Badhan, kuwaas oo noqday kuwo aan biya laga gaadhin iyo kuwo aan biyo badan lahayn.

waxana kamid ah sababaha loo tiirinaayo in mashaaraciidaas biyood midho dhali wayaan:

1. Baadhid (Survey) sax ah oo aan lagu sameyn ilaha biyaha ee hoose.
2. Hay'adaha deeqda bixiya iyo shirkadaha qodaayey oo dabagal iyo kormeer lagu sameynnin.
3. Farsama xumo baahsan oo ay ka mid tahay qalabka loo isticmaalay

qodida oo tayadiisu hooseysay ceelasha qaarkood.

4. Bulshada oo aan laga qeyb gelin tashiga ku aaddan qodista biyaha.
5. Khilaaf iyo is-qabadyo ku saleysnaa qandaraasyada oo dhex maray darafyada biyo qodidda.
6. Cabbirka qodista ilo-biyoodka oo lagu saleyn jiray dhaqaalaha ay deeq bixiyayaashu u qoondeeyeen oo keliya, iyada oo mararka qaybtood dhacdo in dhaqaale intaas kabadan loo baahnaa si biyaha la doonayo loo gaadho.
7. Aqoonta sahanka biyaha iyo farsamada qodidda oo aad u yar.
8. Mashaariicda horumarineed oo badi loo adeegsado dano gaar ah.

Xarunta HADAF, qaybo ka mid ah maamulka iyo bulshada magaalada Badhan ayaa bilaabay sannadkii hore, 2021-kii, olole ah in Magaalada loo helo Ilo biyood oo haqab tiri kara, waxana socda dhaqdhaaqyo badan oo arrinkaas xoojinaya.

Sidaa darteed, waxa aan faalladan ku soo bandhigaynaa dhowr qodob oo aan u aragno inay asaas u noqn karaan ka midha dhalinta dadaaladaas iyo helitaanka Ilo-biyood haqab tira magaalada Badhan.

Sida aynu kor ku soo xusnay waxa la ogsoonyahay in ay jireen caqabado badan oo keenay in maashaariicda Biyaha ee magaalada Badhan hirgeliwaayaan.

Haddaba, si caqabadahaas looga hortaga waxa muhiim ah in la helo:

1. **U heelanayaal isku xidha dadaalada biya raadinta** (**Unug**):

   Shaqo kasta waxa ay u baahantahay cid xil iska saarta, ka midha dhalisa, lagulana xisaabtamo, waana ta loo bahan yahay in la helo u-heelanayaal (Guddi/koox/hay'ad/xafiis gaar ah… IWM) muhiimaddooduna tahay ka midha dhalinta dadaalada biya raadinta magaalada Badhan, kuwaas oo ka shaqeynaaya:

   a. U-qareemidda biyo u helidda magaalada Badhan.
   b. Isu-duwidda iyo mideynta dadaalada socda.

c. Ka talo-bixinta waxqabadyada hirgelinta biyaha magaalada Badhan.
d. Xallinta khilaafyada dhexmara dhinacyada ay khuseyso.
e. Daba-gal iyo kor joogteynta shaqada.
f. La socodsiinta Bulshada waxqabadyada oo dhan iyo hadba meesha ay wax marayaan.

Haddaba, u heelanayaashaas ama guddidaas waxay noqon karaan guddi isku dhaf ah oo ka kookan maamulka iyo Bulshada, kuwaas oo aan wax dheef iyo dano gaar ah ka raadinayn mashaariicdaas, waxana magcaabi kara maamulka heer gobol iyo heer degmo iyagoo la tashanaya qaybaha ay khuseyso.

2. **Mideynta dhaqaalaha ila-biyooodka lagu qodaayo:** si looga hortago in dhaqaale xadidan ceelal tayadoodu hooseyso la geliyo waa in dhaqaalaha hay'adaha iyo deeq-bixiyayaasha kale la mideeyaa si mashruuc biyood oo midha dhal ah loogu hirgeliyo.

   Waxa kale oo suura gal ah in bulshada daneyneysa la siiyo fursad ay ku maalgashan karaan iyada oo loo marayo habka wadaaga danta guud iyo tan gaarka ah (Public Private Partnership-PPP) ama si gaar ah u maalgashtaan.

3. **Sahminta iyo xog raadinta:** Waa in la helaa sahan biyood la isku haleyn karo.

   Dhalliilaaha waxa kamid ah in xogta badi lagu howl galo ay tahay xog hore (sannado hore la qaaday) oo inta badan isku hal meel laga soo qaato (hal xafiis), sidaa darteedna loo bahan yahay in la helo baadhitaan iyo sahmin balaadhan si loo helo xog cusub oo sugan, iyada oo la ogyahay in ay xilligan jiraan shirkado badan oo casri ah, kana shaqeeya sahminta biyaha.

4. **Qoddista:** Shirkadaha wax qodaa waxay ay ku kala duwan yihiin qalabka iyo habka ay isticmaalaan marka ay qodayaan ceelasha

riigaga ah, waxa jira shirkado isticmaala qalab duug ah oo taag daran, sidaa darteed waa in la helo shirkado haysta qalab casri ah oo awood u leh in ay gaadhaan cabirka sahanka ee biyaha lagu heli karo.

5. **Dhererka la qodaya:** shaki badan ayaa ka jira in ceelasha qaybtood aan la qodin dhererkii loo baahnaa ama cabbirkii hay'addaha iyo jihooyinka dhaqaalaha bixinaayey ay rabeen.

   Waa in heshiisyada lagu saleeyaa cabbirka ugu badan ee sahanka, isla markaana la hubiyaa in la qoday.

6. **Ka hortagga Isku milanka Deeq-bixiyayaasha iyo qandaraas qaatayaasha:** arinkaas waxa keena dabagal la'aan, waana mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee keenay in ceelal badan lagu hungoobo, waxa dhacda in shirkado badan oo aan qalab fiican wadan la siiyo qandaraasyada qodidda si loogu naas nuujiyo, waxa kale oo dhacda in ay caddaan weydo dhererkii la rabay in laqoday iyo inkale. sidaa darteed, waa in wakiilada bulshadu ay qayb ka yihiin dhammaan heshiisyada biyaha.

7. **Maamulidda iyo horumarinta ilaha biyaha:** Adduunka horumaray waxa la isla waafaqsan yahy in adeegyada iyo cuntooyinka lama huraanka u ah nolosha ay noqdaan kuwa ku jira gacan aamin ah, lagana ilaaliyo ku tagri falka iyo ka faa'iidaysiga khaldan, sida: biyaha, korontada, cunnooyinka daruuriga ah iyo baahiyah kale muhiim ka ah. waxana la rabaa in cidda masuulka ka ah bulshada ay gacan ku hayaan ama kormeeraan ilaha biyaha.

   Waxa kale, oo jira in mashaariicda bulshada wadaagto, laguna helay magacooda aan cidna si gaar ah u sheegan karin uguna faa'iidaysan karin.

   Haddaba, iyadoo taas laga duulaayo dhanka kalena la fiiriinaayo sii socod siinta iyo ka madho dhalinta mashruucyada biyahaya waxa laga rabaa maamulka inay kenaan qorshe lagu maamuli, sida in la

sameeyo guddida maareynta Ilaha biyaha oo xoogan.
Waxa kaloo mudan in loo sameeyo dhigaal dhaqaale si loogu dayactiro looguna daryeelo.

8. In laga faa'iidaysto sharciyada iyo hahabka biyaha loo maamulo magaalooyinka kale ee dalka.

**Gebagebo:** wadada xalku waxa ay u muuqataa inay tahay in si degdeg ah loo helo jiho isku xidha dadaalada biyo raadinta isla markaasna qorshe ka yeelata habka ugu habboon ee magaalada biyo ku filan loogu heli karo iyada oo maskaxda lagu haynaayo qodobada kor ku xusan.

**Dhammaad**

**Waxa qoray: Maxamed Siciid Faarax.**

**Faallooyinka** Xarunta **HADAF** waa qoraal ay xaruntu ka soo ban dhigto aragtida qoraaga ee arimaha siyaasadda, dhaqaalaha iyo arimah Bulshada ee taabanaya nolosha bulshooyinka Soomaaliyeed.



**Adress : Badhan/Sanaag,Puntland,Somalia**
**www.hadafcenter.org E:mail Hadafcentersom@gmail.com ,**
**00252907000020, 00252907377155,**

**Faallada 10aad: Biyo yarida Magaalada Badhan (Wadada xalka).**